somalí / somaliska

Nu

Bayaanka doorashada ee Xisbiga cagaarka (Miljöpartiet) ee magaalada Stockholm 2018-2022

Val 2018

miljöpartiet de gröna
STOCKHOLMS STAD

Waxaanu raadineynaa adiga igmashadaada aad noogu xil saareyso inaanu magaalada Stockholm ka dhigno mid furfuran, oo waarta casrina ah halkaas oo tayada nolosha ee dhammaan dadka Stockholm iyo jiilka mustaqbalka soo socda diiradda la saarayo. Magaaladeena quruxda badan waa in ay tusaale u noqotaa caalamka marka laga hadlaayo shaqad cimilada, halkaas oo shaqada bay'ada iyo cimiladu ay si cad uga muuqato arimaha siyaasadda. Siyaasadeyadu waxay ku saleysan tahay Agenda 2030 oo leh 17 hadaf oo caalami ah oo lagu sameynaayo horumar waara. Waxaanu aragnaa in uu jirro xiriir weyn oo ka dhaxeeyo arimaha caalamka iyo kuwa maxalliga ah/daakhiliga ah. Codka la siiyo Xisbiga cagaaran (Miljöpartiet) waa cod lagu xoojinaayo shaqada cimilada ee Stockholm, mudnaantana lagu siinaayo meelaha lugta/socodka, baaskiilka iyo gaadiidka dadweynaha halka laga siin lahaa baabuurta iyo in la helo magaalo ay dhammaan carruurtu helaan xaalado koritaan oo wanaagsan. Cimiladu ma sugi karto Stockholm waxay HADDA u baahan tahay siyaasad ka cagaaran.

Magaalo nool, oo boos ka badan loogu talogalay dadka oo kana baabuur yar

1. **Stockholm nool**
   Waxaanu dooneynaa inaan Stockholm ka abuurno waddooyin badan oo aan baabuurtu marin. Waxaanu sidoo kale dooneynaa in aan abuurno jidad lugta ah oo badan, jidadka xagaaga lagu lugeeyo oo ka badan iyo suuqa/barxadaha xagaaga oo ku yaalla duleedka iyo gudaha magaalooyinka, iyo sidoo kale meelo nool ka dhiga dekadaha magaalada iyo goobaha biyaha ku dhow. Dadka reer Stockholm waa inay awoodaan inay ku raaxeystaan magaalada. Waxaanu dadka u abuurnaa meelo badan, iyada oo loo sameeyo jardiinooyin. xadiiqado badan, meelo la fadhiisto, bay'ad waddooyinka, baararka iyo makhaayadaha. Meel hore u ahaa jirtey barxad baabuurta ah ayaa noqon doonta meel lagu xoonsan yahay. Ka dibna sidaas ayaanu ku dhiseynaa magaalooyin ka bini'aadamsan oo aad uga dhaqdhaqaaq badan/ firfircoon.

2. **Fursadaha lagu sameynaayo isboortiga deegaanka maxalliga ee kuu dhow**
   Waxaanu dooneynaa in aan kor u qaadno tayada nolosha iyo caafimaadka iyadoo aanu kuu fududeyno dhaqdhaqaaqyada bulshada, joogitaanka dibadda iyo jimicsiga maalinlaha ah halkaas oo dadku ku noolyihiin, ka shaqeeyaan, wax bartaan oo ay bulshadana kula sheekeystaan. Iyada oo la sameynaayo jiimamka banaanka, dariiqyada jimicsiga iyo meelaha qoob ka ciyaarka ee ku yaala xaafadaha kala duwan, ayaa dadka reer Stockholm waxa la siinayaa fursado ka badan oo iyadoo aan waxba la qorsheyn lagu sameynaayo jimicsiga iyo dhaqdhaqaaqa deegaanka maxaliga ee kuu dhow.

3. **Bandhigyo badan oo dhaqamada kala duduwan iyo habka urur ahaanta oo awood badan**
   Iyadoo la abuuraayo goobo badan oo kulan, tusaale ahaan, sida xarumaha dhaqanka ee xaafadaha, ayaa dadka reer Stockholm waxa la siinayaa fursado ay kaga qayb galayaan bandhigyada dhaqanka iyo habka urrurahaanta ee degaanka maxaliga ah ee u dhow. Waxaanu rabnaa in la balaariyo Dugsiga Dhaqanka

oo dad dheeraad ahi galaan, oo uu yeesho waxyaalo badan oo la kala doordoorto iyo qiime hooseeya, si loogu xaqiijiyo dib-u-kobcinta hal-abuurka ee magaalada. Waxaanu dooneynaa in aan bandhigyada dhaqanka ka dhigno qaar si dhibyar loo heli karro oo farshaxan badan guryaha bulshada la dhiggo, darbiga garaafiiti lagu qoro, oo saacado ka badan furan yihiin maktabadahu, Aqalka Dhaqanka iyo madxafyadeenuba. Waxaanu dooneynaa inaanu dhisno ”repotell” halkaas oo lookaalada lagu tababaranaayo la kireysan karo saacadii. Shaqada bulshada rayidka ah waa in la fududeeyaa lana xoojiyo, iyada oo tusaale ahaan kaalmada urrurada laga dhigaayo mid ka cadaalad badan oo ay xoojiso doorka muhiimka ah ee nidaamka urruradu kaga jiro dimuqraadiyada Stockholm. Dugsiyo badan waa inay awoodaan inay lookaalada ka kireeyaan urrurada.

4. **Magaalo ay dadku lugeynaaya, baaskiilo wataan oo ay gaadiidka dadweynahu raacayaan**
In laga shaqeeyo kobcinta isku socodka lugta, baaskiilka iyo gaadiidka basasku waa inay sii socotaa xilliga doorashada xigta. Sidaa daraadeed, waxaanu rabnaa in aan u qoondayno hal bilyan iyo badh oo kor loogu qaadayo isku socodka, halkaas oo hal bilyan loo qoondeynaayo dariiqyada baaskiilka. Waa inay noqotaa mid soo jiidasho leh in la lugeeyo, oo baaskiil iyo gaadiidka dadweynaha la raaco. Waxaanu dooneynaa in aanu diirada ka soo jeedino lahaanshaha gaariga oo aanuu u soo jeedino helitaanka gaari. Gaadiidka baaburtu waa in la yareeyaa si loo gaaro bartilmaameedyada cimilada ee Stockholm, iyo sidoo kale in la yareeyo diiqa/ciriiriga waddooyinka. Marka la dhimo ciriiriga gaadiidka, ayaa gawaarida gurmadka iyo kuwa gaarigu u baahani ay socon karaan. Bay’ada gaadiidka ee dugsiyada agtood ayaa ahmiyad la siinayaa. Marka magaalada la qorsheynaayo, ayaa tixgelin weyn la siinayaa xaaladaha carruurta.

5. **Hawo nadiif ah iyo bay’ad gaadiidka oo ammaan ah**
Carruurta ayay inta badan hawada xumi saameysaa.

Maanta, ayaa gaar ahaan baabuurta naaftada ah ay sii daayaan qadar badan oo ah walxo halis ah iyo naytarajiin ogsaadhyo. Waxaanu dooneynaa in aan ballaarino aagagga bay'ada si aan gawaarida wasakhda ah aan loogu oggolaan inay wadooyinka iyo meelaha qaarkood ay maraan. Waxaanu rabnaa in aan sii wadno shaqada ah in la sameeyo magaalo ammaan ah oo gaadiid sugan leh. Sidaa daraadeed, waxaanu rabnaa inaan sii wadno hoos u dhimista xawaaraha wadooyinkeena oo aan maalgalino tallaabooyinka nabadgelyada wadooyinka ee magaalada oo dhan. Dadaalladaasi waxay yareyn doonaan tirada shilalka iyo guuxa/qeylada wadada. Waxaanu rabnaa kormeeridda taraafikada ee kamuunka sameeyaan iyo inay dhigan karaan kamaradahooda xawaaraha ee gaarka ah. Waxaanu rabnaa inaan gudaha magaalada qiiq lagu sii deyn sanadka 2030.

6. **Dalxiiska gudaha – sahami Stockholm**
   Stockholm waa magaalo leh bandhigyo dhaqameed cajiib ah, meelo qurux badan oo lagu lugeeyo, meelo lagu qubeysto, makhaayado iyo matxafyo. Waxa Stockholm-tayada la horumarinayaa, dhaqanka iyo dalxiiska iyadoo aanu maalgalino beero badan, meelo lagu lugeeyo iyo meelo lagu dabaasho oo ka caafimaad badan kana nadiifsan. Biyo nadiif ah oo ku yaalla magaalooyinka gudaha iyo dibaddaba, meelo badan oo lagu maydho ayaa la abuuri karaa. Waxaanu rabnaa in dhalinyaro iyo waayeelba ay awoodaan inay ka heli karaan khayraadkeena dhaqanka iyo degaanka ee dabiiciga ah iyo in laga shaqeeyo sidii kor loogu qaadi laha helitaanka. Ka dibna dad badan ayaa lagu soo jiidan karaa jidka dabiiciga ah ee magaalada iyo dariiqyada ulaha barafka lagu ordo.

Magaalo cimilada iyo bay'adda u roon

7. **Magaalo aynu si xoogan u yareynayno waxyaalaheena aynu ku sii deynayno cimilada**
   Stockholm waxay ugu horeyn doontaa shaqada cimilada. Sidaas darteed, ayaa yoolkayaga cimiladu uu u noqon doonaa tusaale magaalooyinka kale. Dhuxul dhagaxda kulaylinta waa

in gebi ahaanba la joojiyaa 2022 iyadoo gubista saliid shidaalka ay joogsan doonto ugu danbeyn 2025. Stockholm waxay ubaahan tahay inay horumariso miisaaniyad kaarboon dhayogsaydhka kaas oo muujinaaya ilaa inta waxa la sii deynaayo ee ay Stockholm iyo dhammaan dunideenuba ay qaadan karto. Magaalada Stockholm waa inay sidoo kale ka hortagtaa isbeddelka cimilada iyada oo kaarboon dhayogsaydhka lagu shubaayo dhulka iyo cagaarka. Kadibna waxaanu noqon doonaa magaalo jawi bay'ad wanaagsan leh 2040.

8. **Magaalo yareynaysa saameynta cimilada ee diyaaradaha**
   Diyaaradahu waxay qeyb weyn ka qeyb qaatan waxa lagu sii deynaayo cimilada Stockholm. Waxaanu dooneynaa inaan hoos u dhigno saameynta cimilada ee diyaaradaha iyada oo aanu xaddidayno hawlaha duulimaadyada shaqada ee shaqaalaha magaalada. Si boos loogu sameeyo guryaha, adeega iyo goobo shaqada, ayaa Garoonka diyaardaha ee Bromma loo xidhi doonaa sida ugu dhakhsaha badan, laakiin ugu dambayn 2038.

9. **Magaalo awooda saarta baabuurta korontada iyo dib u cusboonaysiinta**
   Waa inay sahlanaato in gaari la wada wadaago oo si bay'ada aan waxyeeleynin gaariga loo kaxeysto. Waxaanu dooneynaa inaan aragno ugu yaraan 4000 oo goobo cusub oo lagu jaargareysto baabuurta sanadka 2022 iyadoo lala kaashanayo shirkadaha, tusaale ahaan sida goobo laga jaargareysto oo qasab ah oo ku yaal dhismayaasha iyo garaashyada cusub. Magaalada Stockholm waa inay ugu horeysaa oo ay hubisaa in dhamaan baabuurta adeega ay yihiin kaar korontada ama gaas ku shaqeeya. Waxaanu dooneynaa inaan kordhino soo saarida tamarta la cusbooneysiin karo ee magaalada oo dhan, tusaale ahaan iyadoo ay ku jiraan jiingadaha/unugyada qoraxda oo lagu dhajiyo dugsiyada iyo hoolalka isboortigaa/jimicsiga.

10. **La wadaag halkii aad ka lahaan laheyd**
    Dib u isticmaalka ayaa ah hab fikrad fiican ah oo lagu tashiilo khayraadkeenna xaddidan. Iyada oo la adeegsanaayo Sportotek, baaskiilka iyo

gawaarida la wadaago iyo dib u isticmaalka, ayaa laga qayb qaadan karaa isticmaalka khayraadka oo fiican. Waa inay xaafad kastaa leedahay ugu yaraan hal meel oo dib u isticmaalida. Dadka deggan Stockholm waxay heli doonaan fursad ay ku amaaneystaan qalabka sida tuseele ahaan inay ku ordi karaan barafka. Waxaanu rabnaa in dhammaan dhismayaasha cusub, laga heli karro gawaarida la wadaago iyo baaskiilada la wagaaqo ee dhamaan dadka kiraystayaasha ah.

11. **Qashinkaagu waa khayraad qiimo badan leh**
In la loo celiyo caagadaha balastiga oo la yareeyo isticmaalka caaggu waa muhiim maadaam oo dhammaan balastiga laga sameeyay walxo shidaalka cayriin ah, laakiin sidoo kale in la yareeyo qashinka iyo qurubyada balastiga ee deegaankeena. Halkii loogu maareyn lahaa qashinka, balastiga ayaa balastigan la isticmaalo loogu beddeli doonaa khayraad cusub oo cayin oo qaali ah. Wax aad u yar oo ka mid ah balastiga la soo saaro ayaa dib looga faa'iideystaa. Isticmaalka waxyaalaha balaastiga ah ee deegaannada bulshada waa in la yareeyo. Dooga caaga ah ee la dhigay waa in loo habeeyo/naqshadeeyaa si aan qurubyada balaastiga ahi u sii faafin. Si loogu isticmaalo waxa socda oo looga dhigo Stockholm hogaamiye dhaqaale wareega, waa in ay ahaataa mid aad ay u fududahay in wax dib loogu warshadeeyo.Sidaas awgeed waxaannu maalgelineynaa saldhigyo badan oo dib u warshadeyn telefoonada gacanta/mobile-ka, soo qaadista qashinka cuntada iyo dib u sii kala soocista qashinka guryaha. Qashinka ugu dambeeyntii soo hadha ayaa la gubeyaa si loogu isticaalo kululaynta guryaheena waana inuu ahaado mid aanu ku jirin shidaalka cayrin.

Waxaanu dhisaynaa magaalo cagaaran oo isku dhafan

12. **Magaalooyin horumarleh oo waara oo leh gaadiidka dadweynaha oo u dhow guryaha**
Waxaanu rabnaa in dhamaan xaafadaha ay horumaraan iyagoo iskugu jira guryo, goobaha shaqada, goobo ganacsi, bay'ad, dhaqan,

dugsiyo iyo xanaanada caruurta. Shaqada dhismaha 140,000 guryaha fikrad ahaan cimilada u fiican ee sannadka 2030-ka ayaa sii soconeysa. Waxa ka mid ah iyadoo in dariiqyada gaadiidka loo bedelaayo jidadka magaalooyinka iyo in la dhiso meelo badan oo ku dhowdhow gaadiidka dadweynaha. Waxaanu dooneynaa inaan shuruudo adag ku soo rogno dalabaadka ba'yada oo aan dhisno guryo dheeraad ah oo leh geedo alwaax. Iyadoo dadaal dheeraad ah la galinaayo dayactirka guryaha magaalada, ayaynu kordhinaynaa cimrigooda oo ayna ilaalinaynaa deegaanka dhaqanka u ah magaalada. Magdhowga dabeecadu waa inuu ku jiro qorshaynta magaalada iyo hababka in taas la horumariyo oo la hagaajiyo.

13. Stockholm ka cagaaran

Dabeecada magaalada iyo dhulalka qoyaanka ah ayaa kaalin muhiim ah ka ciyaara abuurista goobo soo jiidasho leh, ilaalin jiritaanka bayoolajiyad kala duduwan oo si fiican magaalada loogu diyaariyo isbedellka jawiga ee watta daadadka iyo hirarka kuleylka xad-dhaafka ah. Sidaa daraadeed, waa inay Stockholm qorsheyso adeegyo bay'ada ee mustaqbalka fog ee deegaanka magaalada. Waxaanu dooneynaa inaan dhisno saqaf cagaaran oo lagu dari karro jiingadaha qorraxda qabta isla hal saqafka kaliya. Iyada loo maraayo mashruuc tijaabo ah, waxaanu higsanaynaa in aan kor u qaado horumarka guryaha oo la heli karro meelaha wax laga beero magaalada. Waxaanu u baahannahay inaan waxbadan galino inaanu nadiifino oo aanu horumarino harooyinka iyo biyo mareenada magaalada, si loogu gaaro shuruudaha EU-da ee xaaladaha wanaagsan ee deegaanka iyo kiimikada.

14. Qorsheynta magaalooyinka oo dimuquraadiga ah oo daneysa arimaha dumarka

Qorshaha dimuqraadiga ahi waxa uu u baahan yahay ka qayb gal ballaaran oo dadka wakiilada ka ah muwaadiniinta ay saameyn ugu yeeshaan geedi socodka. Inay xaqiiqdii haween badani ay ku dareemayaan amaan-

darro meelaha banaan ee dadweynaha ayaa ka dhigaysa in qeyb weyn oo dadka magaalad ka mid ah ay xorriyadoodu xadidan tahay. Iyadoo ay ragga badani wataan gawaari, ayaa waxa jira dumar badan oo raaca gaadiidka dadweynaha, baaskiil ama lugeeya. Sidaa daraadeed, ayaa loogu baahan yahay qorshe magaalada oo sinaanta dumarka ah halkaas oo jardiinooyinka/meelaha lagu ciyaaro, gaadiidka dadweynaha iyo baaskiilada iyo meelaha lugta la qorsheeyay iyadoo loo eegayo helitaanka iyo ammaanka dadka oo dhan. Tani waxay dhacdaa, tusaale ahaan, iyadoo dadka lugeynayaa aanay la marsiin/ isticmaalin godadka/tunelka, inuu jiro iftiin fiican oo meel kasta ku yaala iyo in xadiiqaduhu ammaan yihiin.

15. **Si loo yareeyo baahida guryaha oo guryo loogu dhiso dadka oo dhan**
Stockholm waa inay lahaato guryo helis joogto ah oo la siinayo guryaha uu qof kastaa awoodi karo inuu dalbado. Waxaanu rabnaa in adeegga dadwaynaha la horumariyo. Ugu yaraan kala badh ka mid ah guryaha cusub waa inay ahaadaan kirrada hadhka. Waxaanu rabnaa inaan aragno noocyo badan oo guri ah, sida kireysiga iskaashatada, shirkadaha dhismaha, qandaraasyada saaxiibka iyo guryaha dadweynaha. Hoyla'aanta waa in laga hortago oo qoysaska carruurta leh aan laga saari karin ama aanay ku noolaan karin xaalad guri oo aan sugneyn sida guryaha hoyga hodheelada ama guryaha kontraaga waqtiga gaaban.

Magaalo ay carruurta iyo dhallinyaradu helaan xaalado koritaan oo wanaagsan

16. **Dhammaan carruurta waa inay helaan barbaarin ammaan ah**
Dhammaan carruurtu waxay xaq u leeyihiin xaaladaha koritaanka ee wanaagsan mana aha inay dhacado in carruuri ay la kulmaan rabshado ama xadgudubyo. Carruurta joogta qoysaska leh dhibaatooyinka mukhaadaraadka ama caafimaadka maskaxdu waa

inay helaan taageerada iyo caawimada ay u baahan yihiin. Waxaanu rabnaa in aan dhisno xarumo badan oo qoysaska ah oo aanu ballaarino dadaalka dheeraadka ah si looga hortago inay dhibaatooyinka bulsheedu yimaadaan.

17. **Shaqada adeeg bulsho oo xoogan oo ku dhisa waaritaanka bulshada**
Adeegyada bulshadu waa inuu noqdo mid adag oo qaabili karra dadka u baahan taageero iyo caawimo. Sidaa darteed, waxaa muhiim ah in dadka shaqaalaha bulshada ah la siiyo jawi shaqo oo wanaagsan iyo fursad fiican oo ay ku qabtaan shaqadooda. Iyadoo laga shaqeysiinaayo dad shaqaalaha bulshada ah oo badan iyo kaaliyeyaasha gudaha, ayaynu sii xoojin doonaa shaqada caruurta iyo dhalinyarada oo waxaynu ka qeybqaadaneynaa inay Stockholm noqoto magaalo ammaan ah.

18. **Shaqo xoogan oo laga qabanaayo caafimaadka maskaxda ee dhalinyarada**
Waxaanu rabnaa inaan badalno shaqada lagu hagaajinaayo caafimaadka maskaxda. Tani waxay muhiim u tahay kooxda dhalinta ah ee caafimaad daradda maskaxdu sii kordheyso. Dugsigu wuxuu leeyahay door muhiim ah oo ku saabsan inuu kahortaggo dhacdadan sii socota. Sidaa daraadeed, waxaanu rabnaa in aan sii wadno ahmiyada la siinaayo caafimaadka ardayga iyadoo la shaqaaleysiinaayo la taliyayaal iyo kaalisada dugsiga oo ka badan. Waa inay had iyo jeer ay noqoto mid sahlan in la taliyayaasha lala xiriiro.

19. **Ardeyda la siiyo waqti ay kula kulmaan macallimiintooda – dad ka badan laga shaqaaleysiiyo dugsiyada magaalada**
Arday kastaa waa inuu haystaa waqti uu la qaato macallinkiisa iyo fursada uu ku gaaraayo hadafyada aqoonta. Sidaas daraadeedwaxaanu u baahan nahay dadka waaweyn oo dheeraad ah oo jooga dugsiga lehna doorar kala duwan si ay u gargaarto macalimiinta si ay diiradda ugu saaraan waxbaridda iyo kulanka aadka u muhiimka ah ee u dhexeeya macalinka iyo ardayga. Waxaanu dooneynaa in aan shaqaaleysiino kalkaaliyaasha macalimiinta, barayaasha xilliga firaaqada iyo barayaasha gaarka ah ee dugsiyada magaalada.

20. Dugsi horumarin waarta leh iyo dugsi ”bartamaha tuulada ku dhexyaala”

Waxaynu ku noolnahay waqti ay dhibaatooyinka caalamiga ah iyo kuwa maxalliga ahi ay sii kordhayaan. Waxaanu rabnaa in dugsigu uu carruurteena iyo dhalinyarteena siiyo aalad ay ku xalliyaan caqabadaha berri. Sidaa daraadeed waxaanu rabnaa in aan sii wadno taageerada iyo dhiirrigelinta shaqada dugsiyada si loo horumariyo barashada horumarinta waara. Si ardaydu ugu helaan fahan ku saabsan sida ay bulshadu u shaqeyso iyo caqabadaha horyaala, ayaanu jeclaan lahayn inaanu aragno wada shaqeyn dheeraad ah oo ka dhaxeysa dugsiyada iyo kuwa kale ee sida ganacsiga, bulshada rayidka ah iyo dowladda.

21. Bay’ad ka cagaaran oo carruurta loogu tallogalay

Dugsiyadayada xanaanada waxaanu rabnaa inaan u fidinno jawi aan sun lahayn oo loogu talogalay caruurteena. Sidaa darteed waxaanu rabnaa in aan sii wadno shaqada si aan u badalno qalabka la aqoonsan yahay khatar leeyihiin. Qalabkaas waa inaan lagu isticmaali doono dhismeyaasha cusub. Xannaanooyin iyo dugsiyo badan ayaa leh meelo badan oo daamur leh oo aan dooneyno in aanu jejebino si aanu ugu abuuraan barxaddo qalab dabiici ah leh oo soo jiidanaaya ciyaaraha iyo dhaqdhaqaaqa, iyo xattaa sidoo kale wax beerista iyo waxqabadyada dibadda. Barxada xannaanadu waa inay ahaadaan qaar ka sii weyn oo leh meelo badan oo ilmo kastaa istaagi karro. Waxaanu sidoo kale rabnaa in la kulanka carruurtu ee dabeecadda la horeysiiyo iyadoo abuuraysa dugsiyada dabiiciga ah, ciyaaraha goobaha jardiinooyinka iyo taageeridda sameynta beeraha 4H ah iyo goobaha ciyaarta ee dabiiciga ah.

Magaalo bulsho ahaan waarta

22. Stockholm waa inay noqotaa magaalo dhammaan dadka ammaan u ah

Waxaanu dooneynaa inaan dib u dhisno meelaha aan ammaanka ahayn, waxaanu

xoojinaynaa joogitaanka dadka waaweyn ee ku nool magaalada oo aanu ka hortagno imaanshaha dhibaatooyinka iyadoo la sii waddaayo dadaalada joogtada ah ee dugsiyada, waxqabadyada wakhtiga firaaqada, xarrumaha dhalinyarada iyo adeegyada bulshada. Isla mar ahaantaana, waa inay bulshada si firfircoon uga hortagto toogashada/ dilka iyo falalka danbi ee gaangistarada ee halkan iyada oo loo maraayo dadaalka degdeg ah ee ka socda booliska iyo adeegyada bulshada. Iyadoo loo soo maraayo wadashaqeyn ka dhexeysa waxqabadyada kala duwan ee magaalada, bulshada rayidka ah, goleha gobolka, booliiska, ganacsatada iyo dadka deegaanka, ayaynu wadajir uga shaqeynaa si aynu ugu dhisno bulsho leh falal dambi oo ka yar iyo kalsoonida labada dhinacba ah. Kadibna wanaanu amni darrada u bedelaynaa amaan

23. Daryeelka waayeelka oo leh nolo tayo sare leh

Guryaha dadka hawlgabka oo ka badan waa in la dhisaa, kuwaas oo leh kiro dadka waaweyni ay awoodi karaan. Dhamaan dadka waayeelka ahi waa in ay xaq u yeeshaan gabowsho sugan oo nolol tayo sare ah leh, helitaan fiican oo waxqabadyada ah iyo goobo kulan oo lagaga hor taggo kali ahaanshaha. Sidaa daraadeed, waxaanu rabnaa inaan abuurno xarumo waxqabad oo badan oo loogu talagalay inay dadka waayeelka ah ay u suurto gasho inay ka qeyb qaataan hawlaha bulshada, ka qeyb qaataan khibradaha dhaqameedka, iyo sidoo kale inay wax cunaan oo ay jimicsadaan. Waxtarka waayeelka, waayo-aragnimada iyo rabitaanka ka qayb qaadashada ayaa loo baahan yahay in si wanaagsan looga faa'iideysto. Cuntada guryaha dadka waaweyn ee magaalada waa in lagu kariyaa meesha ugu dhow ee suurtogalka ah oo ay noqotaa mi dhadhan leh, nafaqo leh oo dabiici ah. Waxaanu dooneynaa inaan abuurno meelo muddo gaaban oo waayeelka lagu daryeeli karo waqti gaaban si loogu caawiyo qofka guriga ku daryeelaaya qof qaraabo dhow ah.

24. Stockholm furfuran oo soo dhaweyn leh

Stockholm waa inay noqotaa magaalo furfuran halkaas oo dadka ka soo yaacaaya dagaal iyo dhibatooyinku ay xaalad nabdoon ku dhisi karaan nolol cusub. Waxaanu rabnaa inaan xoojinno xafiisyada muwaadiniinta (medborgarkontoren) si aan ugu siino hagidda bulshada iyo taageerada kale ee loogu talagalay dadka dhowaan yimid Stockholm oo ka wanaagsan. Stockholm-tayada waa inay noqotaa mid ka dhakhso badan in shaqo iyo waxbarasho la helo. Fursadaha la iskugu dhafaayo barashada luqadda iyo xirfadaha waa in la ballaadhiyaa. SFI-du waa in ay lahaato tayo sare oo waa inay noqotaa mid suurtogal ah in la isku darrro waxbarasho iyo baragtiiga. Bulshada rayidka ahi waxay door muhiim ah ka ciyaartaa soo dhaweynta dadka dhawaan yimid Stockholm iyadoo ay tahay in taageero laga siin doono shaqadooda.

25. Magaalo garabka is haysata oo aynu hoos udhiganno dayacsanaanta

Ma jiro qof bani'aadam ah oo bilaa sharci ahi, sidaas daraadeed, magaalada garabka is haysata ee Stockholm waxay dhowraysaa dadka ugu nugul, waxaanay taageero iyo diirimaad siinaysaa meesha looga baahan ahay. Xuquuqda aadanahu waxay khusaysaa dadka oo dhan. Waxaanu aamminsan nahay in carruurta dadka sharci la'aanta ahi marka lagu daro inay dugsiga tagaan ay sidoo kale iyadana tagaan xanaanada iyo inay heli karaan kaalmo dhaqaale. Waa inaanay jirin caruur ku dhaxamooneysa ama ku gaajooneysa Stockholm. Waxaanu sidoo kale dooneynaa inaan si firfircoon u horumarino xaaladaha dadka muwaadiniinta Midowga Yurub ka soo jeeda ee nugul oo aanu xoojino iskaashiga lala leeyahay wadamadooda. Caruurta keligood ah ee ku imaanaya qaxoonti ahaan waana in la siiyo xuquuqdooda waana in la siiyaa fursad wanaagsan oo ay ku soo dhexgalayaan bulshada. Carruurta iyo dadka da 'yarta ah ee halkan yimaada sanadadii ugu danbeeyay waxay wali u sii baahan yihiin taageero iyo daryeel.

26. Magaalo aan lahayn cunsuriyad iyo takoorid
Stockholm waa magaalo dhamaan xirfadaha dadka oo dhan laga faa'iideysto, oo aan cidna loo geysan midabtakoor. Waxaanu rabnaa in aan xoojinno shaqada ka dhanka ah midabtakoorka, nacaybka iyo takoorka oo dhan iyadoon aan loo eegeyn sababaha takoorka. Kor u qaadista aqoonta xuquuqda aadanaha ee dhammaan hawlaha magaalada ayaa sii wadi doona oo xoojin doona. Waxaanu dooneynaa inaan sameyno goobo badan oo kulan oo loogu talagalay dhalinyarada Hbtq iyo dugsigu waa inuu noqdaan meel amaan ah oo loogu talagalay ardayda oo dhan iyada oo aan loo eegin jinsiga, aqoonsiga jinsiga ama muujinta, meesha uu ku tuursan yahay, diinta ama caqiidooyinka kale, naafanimada, galmada iyo da'da.

27. Magaalo qofku meesha uu doono gali karro oo shakhsigu uu leeyahay awooda uu xaaladiisa nololeed ku maamulaayo
Dhamaan dadka Stockholm, iyada oo aan loo eegeyn curyaannimadda waa inay helaan fursad isku mid ah oo ka qaybgalka bulshada ah. Iyadoo si ka wanaagsan loogu soo daraayo dadka naafada ah, ayay Stockholm sii horumareysaa oo noqoneysaa magaalo ka sii fiican. Waxaanu iska ilaalineynaa xalalka gaarka ah ee dadka naafada ah soocaaya, marka aan taas sabab loo hayn, in taas bedelkeeda ahmiyadda la siiyo in magaalada iyo hawlaha waxqabadkeedu ay marwalba heli karaan dadka oo dhan. Galbinta iyo kaalmada shakhsiga waa in ay noqdaan qaar waxqabad is bedbedali kara si qof walba uu uga qaybqaato nolosha bulshada inta isaga shuruudiisa leeg.

28. Stockholm arrimaha dumarka daneysa oo sinaan leh
Stockholm waa inay noqotaa magaalo siman oo aan cidna lagu xaddidneyn jinsigiisa dartiis. Rabshadaha la xiriira sharafta iyo cadaadiska aan la aqbali karin, waana in lala dagaalamo, qof kastaa waa inuu leeyahay awood ay ku maamulayaan noloshooda. Xadgudubka dadka kuu dhow/xiriirka

dhow waa in laga hortagaa, iyadoo dhibanayaasha rabshadaha ay helaan ilaalada iyo taageerada ay u baahan yihiin. Waa inay jiraan tallaabooyin degdeg ah oo cad oo ka dhan ah dhibaataynta jinsiga. Si loo abuuro dadaal hufan oo shaqada ka hortagga rabshadaha ah waa in, noocyada xunxun ee ragnimadda iyo heerarka sharafta la isweydiiyaa oo lagana hortagaa.

29. Xaafado awood badan

Waxaanu rabnaa in saamaynta goleyaasha degaanka la xoojiyo marka laga hadlaayo bay'ada degaanka iyo in si wanaagsan loo dhexgeliyo nidaamka go'aan qaadashada ee magaalada. Waxaanu dooneynaa inaan sameyno tijaabo in golayaasha degaanadu ay go'aan ka gaaraan arimaha dhismaha ee sahlan oo ku saabsan degaankooda. Xaafadahu waxay sidoo kale yeelan doonaan door ballaaran oo lagu wado wadashaqeynta guud ee shaqada waaritaanka degmada. U hawlgalidda degaanka ee muwaadiniinta, siyaasiyiinta maxalliga ah, urrurada iyo ganacsiga waa in si fiican looga faa'iideysto. Waxaanu dooneynaa in macluumaadka magaalada iyo wadahadaladu lala leeyahay dadka deegaanka ahi ay noqdaan kuwo cad oo si sahlan loo heli karo. Waxaanu dooneynaa inaan horumarinno aalada wax soo jeedinta muwaadinnimada ee dhammaan waxqabadka magaalada. Miisaaniyadda muwaadiniinta iyo wada xaajoodka waa laba nooc oo saameyn dhab ah ugu yeelan karaan dadka reer Stockholm. Waxaanu rabnaa in aanu horumarinno ka qaybgalka horumarinta iyo maareynta meelaha cagaaran ee magaalada, iyadoo ay ka mid yihiin heshiisyada isticmaalka iyo beeritaanka magaalada.

miljöpartiet
de gröna

STOCKHOLMS STAD

Nu

Klimatet kan
inte vänta.